

Dugsiyadda Guud ee Portland

QAYBTA 504 EE QAANUUNKA DIB-U-HAGAAJINTA 1973 EE XUQUUQDA WAALIDKA/ARDAYDA
EE AQOONSIGA, QIIMEYNTA IYO MEELAYNTA

Fadlan u hayso sharaxaadan si aad u Raadraaca Mustaqbalka

Kuwa soo socdaa waa sharaxaadda xuquuqda lagu damaanad qaaday sharciga fedraalka tan la xidhiidha ardayda itaalka daran.

Ujeedada qaanuunkan waxaa weeye in si dhamaystiran laguugu wargeliyo go'aanadda la xidhiidha ubadkaaga, iyo in laguu sheego xuquuqda aad uleedahay in aad diidi karto mid walba oo ka mid ah go'aanadaa

Waxaad xaq uleedahay:

1. In ubadkaagu qayb ka noqdo, uu helo fa'iidata barnamijyadda waxbarasho ee dadwaynaha iyadii oo aan la faquuqin sababta itaal daradiisa/deeda;
2. Ay degmadda dugsiyadu kaala taliso xuquuqdaada lagu dhigay qanuunka federaalka
3. Aad hesho wargelin iyadii oo la tixgelinayo aqoosiga, qiimaynta ama meelaynta ubadkaaga.
4. Uu helo ubadkaagu waxbarashadda uu mudanyahay oo bilaash ah, waxaa qayb ahaan ku jira in ubadkaaga wax la barto arday aan itaal darayn tan iyo inta ugu mudan ee ugu badan. Waxaa sidoo kale lagu daraa waxbarashadda rigliga ah ama tan gaadhka ah iyo caawinaadda la xidhiidha iyo adeegyadda loo qaabeeeyey in uu gaadho baahida arday walba oo itaal daran heerkii laga doonayay sida ardayda aan itaalka daraynba ay u gaadheen;
5. In ubadkaagu wax ku barto qalabka islamarkaana uu helo adeegyo u dhigma kuwa la siiyey ardayda aan itaalka darayn;
6. U helo qiimayn, waxbarasho, iyo go'aankii meelaynta oo lagu saleeyey macluumaad badan oo kala duwan, iyo qof yaqaana ardayga, macluumaadka qiimaynta iyo ikhtiyaaraadka meelaynta;
7. In lasiyo gaadiid kasoo qaada aqalka kuna celiya meelaynta barnamijyadda badiilka ah tan oo aan qarash badan kugu ahayn hadii aysan ahayn ardayga in lagu meeleyay barnamij ay maamusho degmadu;
8. In ubadkaaga la siiyo fursad loo simanyahay oo uu oga qayb qaato howlaha aan akadeemiyadda iyo manhajka siyaadada ah ee ay bixiso degmadu;
9. In aad eegto dhamaan diiwaanadda la xidhiidha go'aanadda aqoonsiga ubadkaaga, qiimaynta, barnamijyadda waxbarasho iyo meelaynta;
10. Ku hel macluumaadkiisa wax barasho qiime macquul ah, hadii uusan qiimahaasi saamaynaynin in aad fursad u hesho macluumaadka ubadkaaga;
11. Warcelinta ka imanay dugsiyadda degmadda ee waydiisi macquul ah kan ku jeeda sharaxaadda iyo macnaynta macluumaadka ubadkaaga;
12. Codso cadilaada macluumaadka waxbarasho ee ubadkaaga hadii ay jirto sabab aad u aaminto in aysan sax ahayn, la qalday, ama lagu xadgudbay xuquuqda lahaanshaha ee ubadkaaga. Hadii dugsiga degmadu diido codsigaa cadilidda, waa in ay kugu soo wargeliyaan xili macquul ah, islamarkaana ay kugula taliyaan in aad qabsato dacwad dhagaysi;

13. Codsiga dhagaysiga dacwad nasahan oo la xidhiidha go'aanka ama talaabadda aqoonsiga ubadkaaga, qiimaynta, barnaamijyadda waxbarasho ama meelaynta. Adiga iyo ardaygaagu waxaad qaadan kartaan qaybtiiна dhagaysiga, waxaanad keensan kartaan qareen idin matala, dhagaysiga waa in uu laga codsadaa Maamulka Gobolka iyo Tacliimaadka Dadwaynaha, Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta, 255 Capitol St. NE, Salem, OR 97310-0203, laydda oo la adgeesanayo OAR 581-015-2390 -2395;
14. Codso ashtakadda maxaliga ah adiga oo raacaya 504 PPS ee nidaamka dacwadda.

Maamulaha xaaladda ubadkaaga ee 504: _____.

Magaca /Phone Numbarka

Isuduwaha dugsiga ubadkaaga ee 504 waa: _____.

Magaca /Phone Numbarka

Nuqulka la siiyay: _____ by _____

MM/BB/SS

Saxiixa/Darajadda

Og: Galka guud ee Ardayda, waalidka